

HADDAY DIINTI SOO WEERAREEN URURKI WARTON

Gabaygani wuxuu jawab u yahay buug ay qortay Hay'ad la oran jirtey haddase magacedi loo beddeley PDRC. Hay'adda bug meel ka dhac ku ah Shareecada Islaamka iyo dhaqanka suuban ee Soomalida ayay soo dabacday oo qaybisay. Ka baddoo shacabka oo dhan ayaa ka kakacay, nin la yiraahdo Axmed Barre oo aan macaariif nahay, ayaa igu yiri maxaad arrintan uga gabyi weydey kolka ayaan gabaygan tiriyey wuxuuna ku soo baxay wargeyskii la oran jirey Riyaaq oo ka soo bixi jirey Garowe. waxaana la gaarey in magacii hay'adda laga guuri, gabadhii buuga qortay in Maxkamad la keeno wallow xukun falkeedi ku habbon aan lagu fulin iyo buugtii intii la heli karyey in lagu gubo maxkamadda horteeda, gebi ahaan qodobadaasi waa arrimaha gabaygu dalbanayo in la sameeyo.

Axmedow ka tegey waayadan wawgi maansada e
Waanooyinkaygi ma tirin waafiga ahaaye
Weedhayda maqal manta waad iga wabxaysaaye

Weriyaal sidoodi waxay warar uruurshaanba
Rag aan weer ku soo celinin iyo dumar waraystaanba
Shacabkaa waxbaris loo wadaa nagu wareershaanba
Wixi laysu dedey baa sidii waaga daalacaye
Hadday diinti soo weerareen ururki Warton

Qolo waliba meel weyd ah baa laga wareemaaye
Walbaharka dumarkeenna helay iyo walaahowga
Waxa keenay amase ugu wacan wayska moogtahaye
Warka lagu akhriyey qaybti baan kuu waddacayaaye

Waxba weyso oday loo shubiyo dheri walaaqiisa
Iyo ubadka inad weheshataa waa wax kuma taale
Waa wixii dib kuu riday kun sama ama kasii weyne
Wasiirro iyo madaxweyne iyo waali maad noqotid
Warath-kii xaq maahay dheheen weyne suu yiriye
Magta wax isma dheeraan kartaan nimankan waaweyne
Abtirsiiinta wiilkaad dhashoo odaygu kaa weecshey
Waa gabood falkii lagugu wadey tan iyo waa dheere

Warkaas xumi markuu gaarey bay wagac yiraahdeene
Waqarna fii buyuutikunna bay daba wareegeene
Wa mas'uulun can raciyatahaa cidi ma weelayne
Wathulaatha wa-rubaacadii waa la gees maraye
Wadiiqadi kacaankii horiyo waa waddadi jaane
Intaan hilinku weynaan haddaan haatan laga weecan
Oo dumarka qaar baa walfaye Diinta lagu waabin
Oo aan waraaqaha la gubin faafshey wararkaas xun
Oo aan qolada warton sharciga wiiggan la hor keenin

Walle wiilka wiilkiisa iyo waa danbaan garane